

Raad raaca cabashooyinka

Guddiga caruurta iyo waxbarasha ee degmada Arjeelog wuxuu go'aamiyey in la hirgeliyo nidaam qoraal oo ku saabsan diiwan gelingta iyo baaritaanka cabashooyinka sida ku cad sharciga dugsiyada 4 cutubka 8 §.

Dugsiyada degmada Arjeelog iyo dugsiyada dhalaanka waxaay ka shaqeeyayaan inaay sameeyaan qaab loo horumariyo islamarkaana loo sameeyo waxqabad tayo leh. Guddiga caruurta iyo waxbarashada wuxuu amar ku bixin doonaa in talaabo la qaado haddii aay cadaato inuu gabaabsi ka jiro hawlahaa laga fuliyo degmada.

Nidaamka ku saabsan sida cabashooyinka loo raad raaco wuxuu u fududeeynaa siyaasiyiinta degmada inaay la socdaan arrimaha aay muwaadininta degmada aay xiseenayaan. Muwaadiniinta waa in loo damaanad qaadaa sida loogu qaban lahaa cabashooyinka loo soo gudbiyo.

Qofkii qoraal ahaan cabasho u soo tebiya wuxuu jawaab helayaa 10 casho gudahooda.

Akhbaar dheeri ah iyo foom – eeg lifaaqa.